

**Warqaddan waa in lala diraa Tira-koobyada Waalidka iyo Ardayga, kuwaas oo aad guriga u diraysid haddii macallamiintaada laga daayey in ay qoraan Qorsheyaalka Gaarga ah.**

*Isticmaal baratakoolka warqadda dugsigaaga.*

*Samee is-baddelo ku-habboon dugsigaaga iyo baahidaada.*

\_\_\_\_\_

(Bisha)

\_\_\_\_\_

(Maalinta)

\_\_\_\_\_

(Sannadka)

Gacaliye Waalidiin/Ilaaliyeyaal ee ardayda TAG,

Waxaad haysaa oo la socda warqadan tira-koob oo aan jecelnahay in adiga iyo cunugaaga aad buuxisaan sidaas awgeed macallinka/macallamiinta fasalka waxaa laga yaabaa in ay si ka fiican u qorsheeyaan si ay u daboolaan baahida cunugaaga sannadkan. Waa wado loogu tala galay adiga si aad ku siisid wax-gashi adeegyada TAG oo uu helayo cunugaaga. Fadlan muraajaco ku samee kadibna buuxi tira-koobka labadiisa dhinac.

Macallimiinta/macallinka cunugaaga waxay isticmaalayaan Qorshaha Dhisida TAG si tilmaame ahaan oo ay u go'aaminayaan xeeladaha waxbarista ee ay isticmaalayaan si ay u daboolaan baahida cunugaaga ee loogu tala galay qiimaynta iyo heerka waxbarasho. Qorshaha Dhisida TAG waxaa lagu soo dhejiyay Boodhkeena Akhbaaraadka dugsiga TAG. Intaa waxaa sii dheer, maamuleyaasha dugsiyada waxay waalidiinta kula sameynayaan dib u hubin marka la joogo kulanka ay isugu imaanayaan waalidiinta TAG. Macallimiinta Habeenka-Dib-ugu-noqoshada-Dugsiga waxay sharxayaan xeeladaha waxbarista ee la kala soocay kuwaas oo la isticmaali doono si ay u daboolaan qiimaynta iyo heerka. Waxaad sidoo kale filan kartaa in aad ku aragtid xog dhammbaalada fasalka oo ku saabsan qiimaynta loo isticmaalay go'aaminta qiimaynta iyo heerka waxbarasho ee cunugaaga sidoo kale xeeladaha waxbarista ee la kala soocay. Tani waxay baddaysaa Qorshaha Warbarista Gaarka ah oo ay macallimiinta dugsiga hoose u qoreen ardayda TAG ee la soo aqoonsaday. Dugsiyada leh Qorsheyaasha Dhisida TAG ee sharxaysa dhismaha ballaaran ee dugsiga ka jira oo daboolaya qiimaynta iyo heerka waxaa laga daayey in ay qoraan Qorsheyaasha Waxbarista Gaarka ah(haddii waalid uu waydiisto mooyaane). Dhammaadka sannadka xiga, waxaan tira-koob ka qaadaynaa macallamiinta, waalidiinta iyo maamuleyaasha si loo go'aamiyo haddii aan sii wadayno in aan dabakhno sannadada mustaqbalka. Waxaanu daneenaynaa in aan ogaano waxa, haddii ay wax u dhacaan si ka duwan cunugaaga markii Qorsheha Waxbarista Gaarka ah aan la qorin.

Tira-koobyada waxay siinaysaa xog qiimo leh macallinka asaga/ayada waxay go'aaminayaan sida ugu wanaagsan ee la isugu-qasi lahaa waxa qeexan ee Qorshaha Dhisida TAG xogta adiga iyo cunugaaga aad ku bixinaysiin tira-koobyada. Shirarka waalidka-macallinka macallimiinta cunugaaga waxay akhrinayaan baahida TAG ee cunugaaga, la wadaagida xogta qiimaynta, si laguugu war-geliyo wixii ku saabsan xeeladaha kala soocida ee fasalka gudahiisa ka jira, iyo in ay kuu sharxaan sida isticmaalka xeeladahaasi ay ugu faa'iidaynayso qiimaynta iyo heerka waxbarista cunugaaga.

Shirarka waalidka-macallinka ee la qabanayo Nofeembar, waxaan ku waydiisanaynaa in aad buuxisid foom oo tusinaya in aad nasiisay wax-gashiga waxbarashada cunugaaga adiga oo u sii-maraya tira-koobka iyo ka wada-hadalka barnaamijka waxbarista. Haddii aad rabtid in aad la kulantid macallin waqti kasta kadib shirarka, fadlan taleefoon ama e-mail u dir asaga/ayada si aad u ballansatid.

Daacadnimo,

(Magaca), Isu-duwaha TAG

(Magaca), Maamulaha